

# Muhimada Ka Qayb Qaadashada

*Qiimaynada Waxbarasho ee Gobolka Maine  
(MEA)*



Waa maxay sababta gobolka Maine uu u leeyahay qiimaynta gobolka ee la jaangooyay? Shuruudaha dawladeed ee hoos yimaada Xeerka Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (ESEA) ee wax laga beddelay ee noqday Xeerka Guusha Arday Kasta (ESSA) ayaa uga baahan gobollada oo dhan, oo uu ku jiro gobolka Maine, inay ka sameeyaan qiimayn gobolka oo dhan maaddooyinka xisaabta, wax akhriska iyo sayniska. Ardayda waa in la siiyaa fursado isku mid ah oo ay ku muujiyaan aqoontooda iyo waxa ay samayn karaan iyadoo lagu qiimaynayo waxbarashada heerka fasalka (heerarka akadeemiyada gobolka). Tani waa mid ka mid ah shuruudo badan oo ka mid ah kuwo awood u siinaya gobolka Maine inuu aqbalo lacag ka badan \$70 milyan oo ah maalgelinta dawladda ee dugsiyada Maine.



## Sidee dhibcaha loo adeegsadaa?

Qiimaynta heerka gobol ah keliya waa hal halbeeg tacliimeed oo lagu ogaado waxqabadka ardayda. Xogta waxaa loo isticmaalaa ka qayb ahaan qorshaha la xisaabtanka gobolka si loo aqoonsado dugsiyada u baahan taageero iyo agab dheeraad ah si loo beegsado. Waxaa jira noocyoo kale oo qiimayn oo badan oo ka caawiya macallimiinta iyo dugsiyada inay go'aamiyaan sida ardaydu waxbarashadoodu tahay, tacliin ahaan, la dhaqan bulsho ahaan, iyo shucuur ahaanba. Qiimaynada Waxbarasho ee Gobolka Maine (MEA) waxay faa'iido u yeelan karaan hal xog oo gaar ah oo ka mid ah xogta guud ee waxqabadka ardayga iyo guusha dugsiga.



## Maxaa la isaga baahan yahay?

Ardayda dhigata fasalada 3-8 iyo sannadka koowaad ee dugsiga sare ayaa looga baahan yahay inay ka qayb qaataan qiimaynta gobolka ee sannadlaha ah ee [wax akhriska iyo xisaabta](#). Ardayda dhigata fasalada 5, 8 iyo sannadka koowaad ee dugsiga sare ayaa looga baahan yahay inay ka qayb qaataan qiimaynta gobolka ee [sayniska](#). Intaas waxaa dheer, ardayda loo aqoonsaday inay yihiin arday ku hadasha luuqado kale ayaa looga baahan yahay inay ka qayb qaataan qiimaynta sannadlaha ah ee [aqoonta luuadda Ingiriiska](#). Xeerka Guusha Arday Kasta (ESSA) ayaa uga baahan in ugu yaraan 95% ka mid ah ardayda u-qalanta ee dhigata fasallada isku heerka ah iyo ardayda dhigata dugsiga inay ka qayb qaataan.



Ka warraan haddii gobolka Maine  
uusan gaarin 95% ka qayb  
qaadashada ah?

Waxaa laga yaabaa in gobolka Maiane uu helo lacagaha dawladeed oo yar ee loogu talagalay dugsiyada ku yaala gobolka Maine kuwaasoo wajahaya caqabado waaweyn. Heerarka ka qayb qaadashada ee ka hooseeya 95% waxay sidoo kale qaldi karaan xogta waxqabadka ee dugsiga.



Halkee ayaa xogta laga helaa?

Xogta heerka ka qayb qaadashada waxay ka timaadaa natijjooyinka qiimaynta xilliga gu'ga ee sannadlaha ah iyo liisaska diiwaangelinta/qiimaynta ee ardayda ee Waaxda Waxbarashada (DOE) ee Maine. Waaxda Waxbarashada (DOE) ee Maine waxay adeegsataa xogta ay soo gudbiso qaybta hawlsocodsinta ee dugsiga (SAU) waxayna waafajisaa shuruudaha ka qaybgalka ee lagu dabaqi karo buundooyin kasta.



## Ka warran ardayda naafada ah?

Inta badan ardayda u-qalanta waxbarashada gaarka ah way ka qayb qaataan qiimaynta guud ee akhriska, xisaabta iyo sayniska. Ardaydu waxay ka qayb qaadan karaan qiimayta guud ee leh xammilitaanada sida lagu dhix sheegay qorshaha waxbarasho ee gaarka ah (IEP). Ardayda qabta naafanimada garaadka ee Aadka u weyn ayaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan inay ka qayb qaataan qiimayno kale. Go'aaminta u-qalmitaanka ka qayb qaadashada qiimayno kale ee ku salaysan [halbeegyada guulaha tacliinta ee kale \(AA-AAAS\)](#) waa go'aan u yaala Kooxda IEP-ga, iyagoo adeegsanaya hagista u-qalmitaanka gobolka. Shuruudaha dawladdu ma oggola in ka badan 1% oo ka mid ah wadarta guud ee ardayda la qiimeeyay inay ka qayb qaataan qiimayn kale. Tani waxay sidoo kale saamayn ku keeni kartaa lacagaha dawladeed. Haddii gobolku ka bato xaddiga 1% ah, ka-dhaafitaan ayaa laga codsan karaa Waaxda Waxbarashada (DOE) ee Maraykanka (U.S.). Shuruudda horudhaca u ah codsiga ka-dhaafitaanka waa 95% ka mid ah ka qayb qaadashada Qiimaynada Waxbarasho ee Gobolka Maine (MEAs).

Ma qabtaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan ka qayb qaadashada qiimaynta iyo Qiimaynada Waxbarasho ee Gobolka Maine?

La soo xiriir xubin ka mid ah [Kooxda Qiimaynta ee Waaxda Waxbarashada \(DOE\) ee Maine](#).  
Agaasimaha Qiimaynta Jodi Bossio-Smith, [Jodi.Bossio-Smith@maine.gov](mailto:Jodi.Bossio-Smith@maine.gov)